

Bedelida Mulkiilaha Te Toi Mahana (Bixiyaha Guryaha Bulshada) Xaashida Maclumaadka Kiraystaha (Juulay 2023)

Laga bilaabo 1da Agoosto 2023 Te Toi Mahana, bixiyaha cusub ee Guryaha Bulshada, aaya noqon doona cidda guryaha leh. Halkaan waxaa ku yaalla qaar ka mid ah maclumaadka muhiimka ah oo isbedelkaan.

Ma isbedeli doonaa heshiiskayga kiraysigu?

Maya. Kiraysigaagu wuxuu ka wareegayaa Wellington City Council wuxuuna ku wareegayaa Te Toi Mahana. Waxaad yeellan doontaa isla ijaarkii iyo isla shuruudihii ijaarka. Waxaanu ku qori doonaa bisha Juulay, si aan sharci ahaan u ta'kiidino arrintan. Uma baahnid inaad saxiixdo heshiis kiraysi oo cusub. Kiraysiqaqu waa xafidan yahay.

Yaan siinayaan ijaarka wixii ka dambeeyaa 1da Agoosto?

Wixii ka dambeeyaa 1da Agoosto waxaad u baahan tahay inaad siiso ijaarkaaga Te Toi Mahana. Wuxuu u baahan tahay inaad wax ka bedesho aqooniga bangiga ee aad ijaarka ku bixiso. Lacagta ijaarka wixii ka dambeeyaa 1da Agoosto waxaa laqu bixin doonaa:

Akoontiga Te Toi Mahana: 01 - 1839 - 0947157 - 02

Maxaa ku dhici doona curaartayda ijaarka?

Curaartaada waxaa laga wareejin doonaa City Housing waxaana loo wareejin doonaa Te Toi Mahana. Uma baahnid inaad waxba samayso. Dhamaan curaarta waxaa sii hayn doonta Tenancy Services.

Ma jiri doontaa siyaadin ah ijaarka ah?

Haynta ijaarka ee hadda ah halkeeda ayay joogi doontaa ilaa Sebteembar 2023. Isbedel kasta oo ijaar ka ah wixii ka dambeeya waqtigaas wuxuu noqon doonaa go'aanka Te Toi Mahana. Haddii ijaarkaaqu isbedelo, waxaa laqu siin doonaa ugu yaraan saddex bilood oo oqeysiina.

Ijaarka xadaynta 80+ iyo sida kale ee yagleelida ijaarka halkeeda ma joogaysaa?

Haa. Kabida Xadka Ijaarka la Awoodi karo, heer ku haynta ijaarka, iyo 80+ xanibida ijaarka waxaa loo wareejin doonaa Te Toi Mahana.

Sidee ula xiriirayaa Te Toi Mahana?

Laga bilaabo 1da Agoosto waxaad kala xiriiri kartaa Te Toi Mahana:

Phone: 0800 248 944

Email: info@tetoimahana.org.nz

Websaytka: www.tetoimahana.org.nz

Cinwaanka: Te Toi Mahana, DX Mail SP2550, Wellington, 6011

Shaqada iyo Dakhliga kabida lagu darayo degaanku ma saamaynayaan isbedelka Te Toi Mahana?

Maya. Waxaad u baahan tahay inaad shaqada sii wado iyo Dakhliga/MSD ee la cusboonaysiiyey si loo xaqiijiyo inaad hellayso heerka kaalmada ee saxda ah qimahaaga kiraysiga.

Weli ma sii wadi doonaa isticmaalka Xarunta Adeega Golaha Degmada Wellington oo ku taalla Manners Street?

Haa, ilaa amar dambe. Wuxuu qabanaan qabnaan oo qabnaan qabnaan. Waxaaad awoodi doontaa inaad siiso ijaarkaaga Te Toi Mahana, qabnaan qabnaan ogolaanshaha goobta gaari dhigashada, ama wax weydiitaa Xarunta Adeega Golaha Degmada Wellington.

Sidee kula xiriirayaa shaqada dayactirkha?

Ilaa 31ka Juulay 2023

- Wac Golaha Degmada 04 499 4444, ama
- Iisticmaal Foomka Fixit ee Golaha Degmada Wellington wellington.govt.nz/report-a-problem, ama
- Ku xirmo app-ka FiXiT

Laga bilaabo 1da Agoosto 2023

- Wac ama email u dir Te Toi Mahana, ama
- Kala hadal shaqada dayactirkha la-taliyahaaga ijaarka.

Yaa noqon doona La-taliyahaaga kiraysigaya?

Shaqaalaha Gursiinta badankood ayaa qaadan doona isla doorarkii Te Toi Mahana, kuwaas oo ay ku jiraan lataliyayaasha kiraysiga, kooxda horumarinta bulshada, iyo kooxda dayactirkha tas-hiiaadka. Te Toi Mahana ayaa ta'kiidin doonta kuna bari doonta la-taliyahaaga kiraysiga markay la wareegaan Agoosto gudaheeda.

Sidee Te Toi Mahana u dooran doontaa kiraystayaasha cusub?

Te Toi Mahana waxay heli doontaa kiraystayaal cusub, marka guryaha banaani bataan, laga bilaabo Diiwaangelinta Guryaha Dadweynaha.

Ma cusboonaysiinaysaan saxiixida?

Haa, waan cusboonaysiinaynaa saxixa guryaha la degan yahay si ay uga muuqato Te Toi Mahana. Waan ka saaraynaa magaca Wellington City Council. Taasi waqtii ayay qaadanaysaa in la buuxiyo isbedelka sidaas darteed waxaad arki doontaa ogeysiiska waqtii dhow. Qaar ka mid ah kuwa kunturaada qaata oo shaqada ka qabta gurigaaga waxaa laga yaabaa inay sii haystaan baabuurta iyo lebiska degmada waqtiga hadda lagu jiro.

Kaalmada ayay heli karaan kiraystayaasha aan ku hadlin Ingiriiska?

Haddii aad u baahan tahay kaalmo luqadaada ah, fadlan:

- Ka wac Golaha tel: 04 499 4444 oo weydiiso qof kuu tarjuma. In ka badan 60 luqadoodaa ayaa la heli karaa
- La hadal la-taliyahaaga kiraysiga, wuxuu qabanaan qabnaan qabnaan kaalmeeyaha luqada iyo mutarjam
- Xaashida macluumaadka waxaa lagu heli karaa Te Reo Māori, Jayniis la sahlay, Jayniis, Isbaanish, Carabi, Farsi, Samoan, Tamil, Hindi, Khamiir, Raashiyan, Somali, iyo Barmiis. Waxaa laga heli karaa wellington.govt.nz/community-housing-provider iyo lataliyayaasha kiraysiga.

Xaggee ka heli karaa macluumaad intaas ka badan?

Waxaad ka heli kartaa macluumaad intaas ka badan:

- Online-ka wellington.govt.nz/community-housing-provider
- La taliyahaaga kiraysiga
- Warqadahayaga aan kuu soo dirno
- Warqadaha macluumaadka ee kiraystaha.